DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 21AAD | CADADKA 8AAD | TAARIIKH: 04/08/21 | Lam. 03 |
|---|---|---|---|

FAAFINTA RASMIGA AH

OFFICIAL GAZETTE

الجريدة الرسمية

# WAX KA-BEDDELKA SHARCIGA XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND

| TUSMADA | |
|---|---|
| Qeybta 1aad | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Wax ka-Beddelka Sharciga Xafiiska Garyaqaanka Guud Dowladda Puntland** |
| Qeybta 2aad | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 3aad | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 4aad | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br>WAXBA MALEH |
| Qeybta 5aad | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br>WAXBA MALEH |

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

**DOWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

**XAFIISKA**
**MADAXWEYNAHA**

**ولاية بونت لاند**
**الصومالية**

**مكتـب**
**الـرئيـس**

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**
**OFFICE OF THE PRESIDENT**

**Sharci Lr.03 ee 4[ta] Agoosto 2021, kuna saabsan Wax Ka-beddelka Sharciga Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda Puntland**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80[aad]

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay **XGGW/DPL/44/2021**, kuna taariikhaysan **July 22, 2021.**

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimada Xeerkani u leeyahay Dowladda Puntland

**<u>Wuxuu soo saaray</u>**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1[aad]**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Wax Ka-beddelka Sharciga Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda Puntland.

**Qodobka 2[aad]**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda Puntland.

**Qodobka 3[aad]**

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland.

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

**Tix:-XGGW/DPL/44/2021 Garoowe, Khamiis, Taariikh:- 22/07/2021**

**Ku:- Madaxweynaha DPL**

**Garoowe**

**Ujeeddo:- <u>Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeerka Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda Puntland</u>**

**Mudane Madaxweyne,**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:-** | Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa **64-aad** |
| **MARKUU ARKAY:-** | Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/25/2021 ee February 10, 2021 kuna saabsan wax-ka-bedelka Xeerka Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda Puntland. |
| **MARKUU TIX-GELIYEY: -** | Baahida loo qabo Wax-ka-bedelka iyo kaabista Xeerka Xafiiska Garyaqaanka Guud. |
| **MARKUU ARKAY: -** | Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 48-aad, fadhigiisii 13-aad ee 11.07.2021 cod gacan taag ah **(37)** Mudane ku ansixiyeen Wax-ka-bedelka Xeerka Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda Puntland, diidmo majirin **(0)**, halka uu ka aamuusey **(1)** mudane. |

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeerka Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND
OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

# DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
# GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

# WAX-KA-BEDELKA XEERKA XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA PUNTLAND

## LUULIYO, 2021

## GAROOWE, PUNTLAND, SOOMAALIYA

**TUSMO** **BOGGA**

Erey Bixin ........ 1
Qaybta Koowaad ........ 2
Qodobo Guud ........ 2
Qodobka 1-aad ........ 2
Magaca Xeerka ........ 2
Qodobka 2-aad ........ 2
Ujeeddada iyo Baaxadda Xeerka ........ 2
QAYBATA LABAAD ........ 2
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD ........ 2
Qodobka 3-aad ........ 2
Dib-u-Habayn ........ 2
Qodobka 4-aad ........ 2
Madaxbannaanida Xafiiska Garyaqaanka Guud ........ 2
Qodobka 5-aad ........ 2
Xarunta Xafiiska Garyaqaanka Guud ........ 2
Qodobka 6-aad ........ 2
Magacaabidda Garyaanka Guud iyo Ku-xigeenkiisa ........ 2
Qodobka 7-aad ........ 3
Shuruudaha Qofka Loo Magacaabayo Garyaqaanka Guud iyo Ku-Xigeenkiisa ........ 3
Qodobka 8-aad ........ 3
Xil ka Qaadista Garyaqaanka Guud iyo Ku-xigeenkiisa ........ 3
Qodobka 9-aad ........ 3
Xuquuqda Xafiiska Garyaqaanka Guud ........ 3
Qodobka 10-aad ........ 4
Danaha Iska Hor-imanaya ........ 4
QAYBTA SEDDEXAAD ........ 4
WAAJIBAADKA IYO AWOODAHA ........ 4
Qodobka 11-aad ........ 4
Xilka iyo Awoodaha Garyaqaanka Guud ........ 4
Qodobka 12-aad ........ 5
Xilka iyo Waajibaadka Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ........ 5
QAYBTA AFRAAD ........ 5
QAAB-DHISMEEDKA XAFIISKA ........ 5
Qodobka 13-aad ........ 5
Qaab-dhismeedka Xafiiska Garyaqaanka Guud ........ 5



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

**Qodobka 14-aad** ........ 5
**Waaxyaha Agaasinka Xafiiska** ........ 5
**Qodobka 15-aad** ........ 5
**Qaybaha iyo Unugyada Waaxyaha Xafiiska** ........ 5
**Qodobka 16-aad** ........ 6
**Mas'uuliyadaha Agaasimeyaasha Waaxyaha** ........ 6
**Qodobka 17-aad** ........ 6
**Garyaqaanno Dawladeed** ........ 6
**Qodobka 18-aad** ........ 6
**Shuruudaha Shaqeynta** ........ 6
**Qodobka 19-aad** ........ 6
**Xasaanadda Garyaqaanka Guud iyo Ku-xigeenkiisa** ........ 6
**Qodobka 20-aad** ........ 6
**Shaqaalaha kale ee Xafiiska Garyaqaanka Guud** ........ 6
**QAYBTA SHANAAD** ........ 7
**QODOBBO KALA DUWAN** ........ 7
**Qodobka 21-aad** ........ 7
**Khibradda Sharciyeed iyo Horumarinta Xirfadda** ........ 7
**Qodobka 22-aad** ........ 7
**Warbixin Sannadeed** ........ 7
**Qodobka 23-aad** ........ 7
**Xeer-nidaamiyeyaal** ........ 7
**Qodobka 24-aad** ........ 7
**Burin** ........ 7
**Qodobka 25-aad** ........ 7
**Dhaqangal** ........ 7

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

## Erey Bixin

Xeerkan gudihiisa haddii aan si kale loo fasirin, ereyada iyo weeraha soo socda waxaa micnihoodu noqonayaa sidan soo socota;-

| Lr. | Ereyga | Macnaha |
|---|---|---|
| 1. | **Dawlad** | Waxaa loola jeedaa dawladda Puntland ee Soomaaliya |
| 2. | **Xubnaha dawladda** | Waxaa loola jeedaa dhammaan hay'adaha dawladda Punland ka kooban tahay. |
| 3. | **Garyaqaan Guud** | Waxaa loola jeedaa madaxa xafiiska u qaabilsan difaaca xuquuqda iyo ilaalinta danta dawladda Puntland. |
| 4. | **Ku-xigeen Garyaqaanka Guud** | Waa qofka ku xiga Garyaqaanka Guud kana caawiya gudashada waajibaadkiisa shaqo. |
| 5. | **Xafiis** | Waxaa loola jeedaa xafiiska Garyaqaanka Guud ee dawladda. |
| 6. | **Garyaqaan dawladeed** | Waa qareen jaamici sharciyaqaan ah oo u dooda xubnaha dawladda maxkamadaha hortooda kana tirsan xafiiska Garyaqaanka Guud. |
| 7. | **Doode dawladeed** | Waxaa loola jeedaa isla garyaqaanka dawladeed markuu maxkamadaha ka hor doodayo. |
| 8. | **Agaasin** | Waxaa loola jeedaa waax kasta oo uu madax ka yahay agaasime ka tirsan xafiiska Garyaqaanka Guud. |
| 9. | **Waax** | Waxaa loola jeedaa waax kasta oo ka mid ah agaasin ama qayb gooni u taagan oo ka mid ah xafiiska Garyaqaanka Guud. |
| 10. | **Unugyo/kooxo** | Waxaa loola jeedaa dad tiradoodu kooban tahay oo habeysan lehna hoggaamiye kana tirsan Xafiiska Garyaqaanka Guud |
| 11. | **Qoraallo dawladeed** | Waxaa loola jeedaa qoraal kasta oo ka soo baxa hay'ad dawladeed oo ay ku jiraan heshiisyada ay dhinac ka tahay dawladdu ama xubin ka mid ah. |

## Qaybta Koowaad
## Qodobo Guud

### Qodobka 1-aad
### Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa "Xeerka Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda Puntland".

### Qodobka 2-aad
### Ujeeddada iyo Baaxadda Xeerka

1. Ujeeddada Xeerkani waa in lagu dhiso, laguna maamulo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda Puntland.
2. Baaxadda xeerkani waxay ku fidsan tahay dhulka Puntland oo dhan.

## QAYBATA LABAAD
## XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD

### Qodobka 3-aad
### Dib-u-Habayn

Waxaa wax-ka-bedel, kaabis iyo toosin lagu sameeyey sharci Lr. MW/PDS/11/99 ee 25/02/1999.

### Qodobka 4-aad
### Madaxbannaanida Xafiiska Garyaqaanka Guud

Xafiiska Garyaqaanka Guud waa hay'ad dawladeed oo gaar ah lehna madaxbannaani shaqo, lana xiriirsan Madaxtooyada Dawladda Puntland.

### Qodobka 5-aad
### Xarunta Xafiiska Garyaqaanka Guud

1. Xarunta Dhexe ee Xafiiska Garyaqaanka Guud waa Caasimadda Dawladda Puntland ee Garoowe.
2. Xafiiska Garyaqaanka Guud wuxuu ku yeelan karaa Gobollada Puntland xafiisyo ama wakiillo metela oo fuliya hawsha sharci ahaan xafiisku u idmado.

### Qodobka 6-aad
### Magacaabidda Garyaanka Guud iyo Ku-xigeenkiisa

Garyaqaanka Guud iyo Ku-xigeenkiisa waxaa lagu magacaabayaa dikreeto uu soo saaro Madaxweynaha Dawladda Puntland, ka dib marka la hubiyo sugnaanta shuruudaha ku xusan qodobka 7-aad ee xeerkan.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 7-aad
## Shuruudaha Qofka Loo Magacaabayo Garyaqaanka Guud iyo Ku-Xigeenkiisa

Qofka loo magacaabayo Garyaqaanka Guud ee Dawladda Puntland iyo ku-xigeenkiisa waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda:-

1. Waa inuu yahay Muslim ahna muwaadin Puntland ah.
2. Waa inuu leeyahay aqoon sharci oo gaadhsiisan ugu yaraan shahaado jaamacadeed oo heerka labaad ah lana aqoonsan yahay.
3. Waa inuu leeyahay ugu yaraan waayo-aragnimo shan sano (5) ah oo uu ku soo shaqeeqey xirfadda sharci-yaqaannimada sida qareen, garsoore ama xeer ilaaliye.
4. Waa in aan maxkamadi ku ridin xukun ciqaabeed oo kama dambeys ah shantii (5) sano ee ugu dambeysey.
5. Waa in caafimaadkiisu fiican yahay oo uusan qabin jirro ka reebeysa gudashada waajibaadkiisa shaqo.
6. Waa in aan da'diisu ka yarayn soddon (30) sano.
7. Waa inuu leeyahay dhaqan suuban, bulshada dhexdeedana uu ku leeyahay sumcad wanaagsan, kana reeban yahay isticmaalka maandooriye kasta oo ragaadin kara shaqada xafiiska.

## Qodobka 8-aad
## Xil ka Qaadista Garyaqaanka Guud iyo Ku-xigeenkiisa

1. Garyaqaanka Guud iyo ku-xigeenkiisa waxaa xilka looga qaadi karaa dekreeto uu soo saaro Madaxweynaha dawladda Puntland, kaddib markay sugnaadaan sababaha soo socda:

b. Xil gudasho la'aan joogto ah sabab kasta haku timaadee.

t. Ku xad-gudub shareecada islaamka, dastuurka iyo qawaaniinta kale ee dalka ama uu ku kaco hab-dhaqan xun oo dhaawacaya sharafta iyo sumcadda xafiiska loo magacaabay.

2. Waxaa kale oo ay Garyaqaanka Guud iyo ku-xigeenkiisu xafiiska ku bannayn karaan;

b. Geeri.

t. Iscasilaad qoraal ah oo Garyaqaanka Guud ama ku-xigeenkiisu u soo gudbiyo Madaxweynaha dawladda Puntland.

j. Hawl-gab.

## Qodobka 9-aad
## Xuquuqda Xafiiska Garyaqaanka Guud

1. Garyaqaanka Guud iyo ku-xigeenkiisu waxay yeelanayaan xuquuq mushahar iyo gunno.
2. Dhammaaan Garyaqaannada Xafiiska Garyaqaanka Guud iyo shaqaalaha kaleba waxay yeelanayaan xuquuq mushahar iyo gunno.
3. Xuquuqda mushahar iyo gunno ee xafiiska Garyaqaanka Guud waxaa jaan goynaya Wasaaradda Maaliyadda Dawladda Puntland.

## Qodobka 10-aad
## Danaha Iska Hor-imanaya

Garyaqaanka Guud iyo ku-xigeenkiisu inta ay xilka xafiiska hayaan, waxaa ka reeban qabashada shaqo kale oo ay mushahar ku qaataan, kamana shaqayn karaan danahooda dhaqaale oo u gaarka ah.

# QAYBTA SEDDEXAAD
# WAAJIBAADKA IYO AWOODAHA

## Qodobka 11-aad
## Xilka iyo Awoodaha Garyaqaanka Guud

Garyaqaanka Guud ee Dawladda Puntland wuxuu u-xil-saaran yahay:-

1. Ka talo-bixin sharci hadba arrimaha looga soo jeediyo Madaxtooyada iyo xubnaha kale ee dawladda Puntland.
2. Daryeelidda iyo ilaalinta xuquuqda iyo danta guud ee dawladda Puntland iyo xubnaheeda.
3. Diyaarinta ama ka talo-bixinta hindise sharciyeedka iyo xeerarka loo gudbinayo Golaha Wasiirada ama Golaha Wakiillada.
4. Difaacidda dawladda iyo xubnaheeda dacwadaha lagu soo oogo ama iyagu soo oogaan maxkamadaha hortooda dhinaca dacwadaha madaniga oo ay ku jiraan kuwa shaqada, idaariga iyo dastuuriga.
5. Ka tala-bixinta iyo iskuduwidda qandaraasyada iyo heshiisyada ay dhinac ka tahay dawladda Puntland ama xubneheeda.
6. Diyaarinta heshiisyada ka dhalan kara dacwadaha ka socda maxkamadaha isagoo kala tashanaya xubinta dawladda ee ay khuseyso.
7. Dhex-dhexaadinta khilaaf kasta ee qaanuuni ah ee ka dhex dhasha xubnaha dawladda Puntland, wuxuuna soo saarayaa qoraal soo jeedin ah oo la xiriira dhex-dhexaadinta arrintaas.
8. Isku duwidda iyo soo-saaridda Faafinta Rasmiga ah ee dawladda Puntland.
9. Keydinta nuqulka asalka ah ee sharciyada, xeerarka iyo waraaqaha rasmiga ah ee ku soo baxa Faafinata Rasmiga ah.
10. Kormeerka, habaynta, socodsiinta iyo qaybinta hawlaha xafiiska isagoo daryeelaya danta guud ee dawladda.
11. Beddelaadda doodeyaasha xafiiska isagoo la-tashanaya ku-xigeenkiisa.
12. Tallaabo ka qaadista anshaxa shaqaalaha Xafiiska Garyaqaanka Guud isagoo raacaya habraaca uu faraayo xeerka shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda Puntland.
13. Bixinta talooyinka iyo tusaalooyinka loo baahan yahay ee la xiriira habsami-u-socodsiinta hawlaha xafiiska.
14. La socodsiinta qoraal ahaan xafiiska Madaxtooyada wax-qabadka iyo caqabadaha la soo gudboonaada xafiiska Garyaqaanka Guud, lixdii biloodba mar oo ka bilaabaneysa bisha koowaad ( janaayo) sannad kasta.
15. Garyaqaanka Guud isagoo la-tashanaaya ku-xigeenkiisa wuxuu soo jeedin karaa magacaabista, bedelka, dallacsiinta, anshax-marinta iyo abaal-marinta agaasimeyaasha waaxyaha, garyaqaannada xafiiska iyo shaqaalaha kale.
16. Wixii kale ee hawl ah ee khuseeya xafiiska ee uu faro Madaxweynaha Dawladda Puntland.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 12-aad
## Xilka iyo Waajibaadka Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud

Xilka iyo waajibaadka ku-xigeenka Garyaqaanka Guud wuxuu noqonayaa;-

1. Inuu ka caawiyo Garyaqaanka Guud gudashada waajibaadkiisa.
2. Waxa uu qabtaa xilka iyo waajibaadka Garyaqaanka Guud marka uu Puntland ka maqan yahay ama uusan si ku-meel-gaar ah xilkiisa u gudan karin.
3. Wuxuu Garyaqaanka Guud kala taliyaa soo jeedinta qorista, magacaabista iyo beddelaadda agaasimeyaasha waaxyaha, garyaqaannada xafiiska iyo shaqaalaha kale.
4. Wuxuu fuliyaa hawlaha uu u wakiisho Garyaqaanka Guud oo aan ka baxsanayn awooddiisa.

# QAYBTA AFRAAD
# QAAB-DHISMEEDKA XAFIISKA

## Qodobka 13-aad
## Qaab-dhismeedka Xafiiska Garyaqaanka Guud

Xafiiska Garyaqaanka Guud waxa uu ka koobnaanayaa:

1. Garyaqaanka Guud ee dawladda Puntland oo ah madaxa xafiiska.
2. Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee dawladda.
3. Agaasimeyaasha waaxyaha.
4. Garyaqaanno dawladdeed.
5. Shaqaalaha kale ee xafiiska.

## Qodobka 14-aad
## Waaxyaha Agaasinka Xafiiska

Xafiisku wuxuu yeelanayaa Waaxyo Agaasin oo ku shaqeynaya sida uu marba Garyaqaanka Guud u habeeyo oo ay ka mid yihiin:-

1. Waaxda ka talo-bixinta arrimaha sharci ee aan dacwado la xiriirin.
2. Waaxda dacwo gelidda iyo ka talo-bixinta meelaha lagu muransan yahay.
3. Waaxda Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.
4. Waaxda maamulka xafiiska.

## Qodobka 15-aad
## Qaybaha iyo Unugyada Waaxyaha Xafiiska

Waaxyaha xafiiska waxaa hoos imanaya qaybo iyo unugyo ama kooxo, kuwaas oo ay ka mid noqon karaan qaar ka shaqeeya:-

1. Arrimaha danta guud.
2. Arrimaha hab-xirfadeedka sharciga iyo maareynta dacwadaha.
3. Arrimaha la xiriira diiwaan-gelinta dhulka danta guud, hantida maguurtada ah ee dawladda iyo hay'adaha kale ee dawladda ka mid ah ama qayb ku leedahay.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 16-aad
## Mas'uuliyadaha Agaasimeyaasha Waaxyaha

1. Xilalka Agaasimeyaasha Waaxyaha, tiradooda iyo jaranjarada kala sarayntooda maamul ahaaneed waxaa lagu kala qeexi doonaa xeer-hoosaadka xafiiska.
2. Dhammaan Agaasimeyaasha waaxyaha waa iney leeyihiin aqoon iyo khibrad sharciyaqaannimo, marka laga reebo jagooyinka maamul ee aan u baahnayn xirfad garyaqaannimo, waxayna ahaanayaan Garyaqaanno dawladeed.

## Qodobka 17-aad
## Garyaqaanno Dawladeed

1. Garyaqaanka dawladeed ee sharciyaqaanka ah ee ka hawlgelaya xafiiska Garyaqaanka Guud ee aan ku iman magacaabid Madaxweyne, wuxuu ku imaan karaa tartan furan ama dallacsiin qof hore ugu shaqeynayey Xafiiska ama soo beddelid la dhigma.
2. Garyaqaanka Guud waxa uu oggolaan karaa, marka loo baahdo, in Garyaqaan dawladeed uu ka shaqeeyo xafiis laan dawladeed muddo gaaban si xirfadiisa sharciyeed looga faaii'deysto, Garyaqaankuna uu si gaar ah u barto hawlaha xafiiskaas.

## Qodobka 18-aad
## Shuruudaha Shaqeynta

1. Garyaqaannada Xafiiska Garyaqaanka Guud, heer kasta ha ahaadeene, waxaa hawlgabkooda lagu dhaqayaa sida uu qabo Xeerka Hawl-gabka iyo Liil-tirka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland, hase yeeshee, haddii danta guud awgeed loo baahdo in garyaqaan uu sii wado shaqada uu hayo, wuxuu Garyaqaanka Guud soo jeedin karaa in dib loogu dhigo muddada hawlgabnimada inta laga heleyo hawlwadeen buuxin kara kaalintiisa ama si kale xal loo helayo.
2. Iscasilaadda garyaqaannada dawladeed iyo shaqaalaha kale ee xafiiska, darajo kasta ha ahaadeene, waxaa loo gudbinayaa Xafiiska Garyaqaanka Guud waxayna dhaqangeleysaa taariikhda uu aqbalo Garyaqaanka Guud iyadoo la raacayo habraaca uu qabo xeerka shaqaalaha rayidka ah ee dawladda.

## Qodobka 19-aad
## Xasaanadda Garyaqaanka Guud iyo Ku-xigeenkiisa

Garyaqaanka Guud iyo ku-xigeenkiisu waxay leeyihiin xasaanad, waxaana laga xayuubin karaa haddii lagu qabto iyagoo ku jira faldembiyeed lagu muteysanayo ciqaab, sida uu qabo qodobka 131-aad, faqraddiisa 4-aad ee dastuurka dawladda Puntland.

## Qodobka 20-aad
## Shaqaalaha kale ee Xafiiska Garyaqaanka Guud

Garyaqaanka Guud wuxuu u hawlgelayaa qorista shaqaalaha kale ee looga baahan yahay iyo hirgelinta waajibaadka iyo shaqooyinka kale ee Xafiiska. Shaqaalaha xafiiskan qoristooda, magacaabiddooda, dallacsiintooda iyo xaaladdooda shaqo waxaa loo hoggaansamayaa hannaanka iyo habraaca ku tilmaaman xeerka shaqaalaha rayidka ah ee dawladda.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## QAYBTA SHANAAD
## QODOBBO KALA DUWAN

### Qodobka 21-aad
### Khibradda Sharciyeed iyo Horumarinta Xirfadda

1. Garyaqaanka Guud wuxuu markii loo baahdo, u dirsan karaa qareenno aan xafiiskiisa ka tirsaneyn hawl qareennimo oo ku saabsan mashruuc ama dacwad gaar ah, si uu u isticmaalo khibraddooda sharci oo u muuqata waqtigaas mid aan laga helin xafiiska Garyaqaanka Guud.
2. Si uu kor ugu qaado xirfadda sharciyeed ee Garyaqaannada xafiiska, Garyaqaanka Guud wuxuu muddo xaddidan u magacaabi karaa Garyaqaan xafiiskiisa ka mid ah inuu la shaqeeyo khabiir sharci oo Soomaali ama ajnebi ah.
3. Garyaqaanka Guud wuxuu u hawlgelayaa aasaasidda xiriir istaageersi iyo wada shaqayn ee xafiisyada dhigiisa ah ee heer dawladeed.

### Qodobka 22-aad
### Warbixin Sannadeed

Garyaqaanka Guud wuxuu warbixin sannadeed ka diyaarinayaa shaqada, shaqaalaha iyo maaliyadda Xafiiska dhammaadka sannad walba, isagoo qeexaya horumarka Xafiisku gaarey iyo caqabadaha la soo gudboonaadey laga bilaabo bisha koowaad (Janaayo) ilaa bisha labo iyo tobnaad (Diseember) ee sannad kasta. Warbixinta oo tifatiran waxaa loo gudbinayaa Madaxweynaha dawladda Puntland ugu dambeyn 15-ka bisha koowaad (Janaayo) ee sannadka cusub.

### Qodobka 23-aad
### Xeer-nidaamiyeyaal

1. Madaxweynuhu wuxuu soo saari karaa xeer-nidaamiye ku saabsan hannaanka, nuxurka iyo daabacaadda Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.
2. Garyaqaanka Guud wuxuu soo saari karaa xeer-hoosaadyo iyo tilmaamo si loo hirgeliyo dhammaan qodobbada xeerkan iyo xeer-nidaamiyeyaasha ku saabsan Xafiiska, amaradaas oo aan khilaafi karin qodobbada xeerkan iyo xeer-nidaamiyeyaasha uu soo saaro Madaxweynuhu.

### Qodobka 24-aad
### Burin

Waxaa la buriyey sharci, xeer iyo wax kasta oo leh awood qaanuun oo aan la socon karin ama ka horimanaya xeerkan.

### Qodobka 25-aad
### Dhaqangal

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR